# Grand Forks Public Schools

# *Buug-gacmeedka Waxbarashada Guriga 2022-2023*

GRAND FORKS PUBLIC SCHOOLS

A great place to grow and learn!

## Foreword

Waxbarashada guriga ayaa kamid ah qaababka kaladuwan ee waalidiintu ku buuxin karaan masuuliyadooda waxbarista carruurtooda. Baarlamaanka North Dakota ayaa ansixiyay sharciyo si loo xaqiijiyo in waajibaadka gobalka iyo masaalixda sharciga ah ee mawduucaan sidoo kale loo damaanad qaado loona ilaaliyo. Marka la isku daro xaquuqda iyo masaalixda gobalka iyo waalidiinta, gobalka ayaa masuuliyadaha qaar u wakiishay degmo dugsiyeedyada maxaliga ah si ay ula shaqeeyaan macalimiinta guriga si loo xaqiijiyo in ardayda ku dhaqan North Dakota ay helayaan waxbarasho tayo leh.

Degmo Dugsiyeedka Grand Forks Public School ayaa diyaarisay buug-gacmeedkaan si loo caawiyo macalimiinta waxbarashada guriga. Buuggu wuxuu bixinayaa xog, wuxuu sharaxayaa habraacyada, wuxuuna ka jawaabayaa qaar kamid ah su'aalaha guud ee macalimiinta waxbarashada gurigu ka qabaan waxbarashada guriga.

Xafiiska Kaaliyaha Kormeeraha
Guud oo ku yaala 2400 47th Avenue
S.
Grand Forks, ND 58201 701-746-

2200 ext. 7115

**Liiska Mawduucyada**


| | |
|---|---|
| Qeexitaanka Waxbarashada Guriga | 4 |
| Qofkee wax bari kara arday guriga wax lagu baro? | 4 |
| Waa maxay masuuliyadaha macalimiinta waxbarashada guriga? | 4 - 6 |
| Waa maxay masuuliyadaha saaran Degmo Dugsiyeedka? | 6 |
| Waa maxay masuuliyadaha imtaxaanka ee macalimiinta waxbarashada guriga? | 6 - 7 |
| Maxay tahay inuu waalidku u keeno Grand Forks Public Schools haddii ay doonayaan in cunugooda laga diiwaan gasho dugsi kadib markuu dhigan jiray waxbarashada guriga? | 7 |
| Ardaygayga guriga wax lagu baro ma laga diiwaan gelin karaa fasallada mana ka qaybgeli karaa Nashaadaadka ka baxsan manhajka ee dugsiyada Grand Forks Public Schools? | 7 |
| Guriga wax ma ku bari karaa cunugayga naafada ah? | 7 - 8 |
| Ardaydayda guriga wax lagu baro ma heli karaan shahaadada dugsiga sare? | 9 |
| Sidee ayay macalimiintayda guriga ku helayaan agabka waxbarashada? | 9 |
| Waa maxay fursadaha waxbarashada ee federaalku maal gasho ee aan heli karno? | 9 |

***Waa maxay waxbarashada guriga?***
Waxaa lagu qeexaa barnaamij waxbarasho oo ay kormeere ka yihiin waalidka ama masuulka sharciga ah ee ilmaha. "Kormeer" waxaa laga wadaa xulashada agabka, go'aaminta falsafada waxbarashada, iyo korjoogtada qaabka, habka, iyo biixnta casharada. Ka qaybgalka barnaamijkaan ayaa buuxinaysa shuruudaha sharciyan qasabka ah ee sharciga gobalka. (N.D. Century Code 15.1-23-01)

***Qofkee wax bari kara arday guriga wax lagu baro?***
Waalid ayaa u qalma inuu kormeero barnaamijka waxbarashada guriga haddii waalidku leeyahay shahaadada dugsiga sare ama shahaadada waxbarashada guud (GED). "Waalid" waxaa ku jira masuulka sharciga ah ee ilmaha.

Waalid aan buuxin shuruudaha aqoonta ayaa kormeeri kara waxbarashada guriga laakiin waa qasab in asagana kor lagala socdaa sida ku cad qaybta 15.1-23-07 labada sano ee koowaad. Haddii cunugu helo buuntada imtaxaanka qasabka ah oo celcelis ah taasoo ka hoosaysa boqoleeyda shan-iyo-tobnaad ee heer qaran, waalidka waa in la kormeeraa sanad dheeraad ah. Haddii kormeerid qasab tahay sida ku cad 15.1-23-07, degmada dugsiga ayaa u xilsaaraysa kadibna dhiibaysa qarashka qof kormeeraaya ardayda waxbarashada guriga lagu siinaayo ilaa in waalidku u sheego maahee degmada dugsiga in waalidku dooran doono uuna qarashkiisa dhiibaayo qof kormeeraaya ilmaha. Qofka kormeerka samaynaaya waa in uu lahaadaa ruqsad macalinimo oo ay bixiyeen gudiga heerarka iyo farsamooyinka waxbarashada. Qofka kormeeraha ah waa inuu u soo sheegaa hormarka ardayda labo jeer sanad dugsiyeed kasta kormeeraha dugsiga.

***Waa maxay masuuliyadaha macalimiinta waxbarashada guriga?***
Ugu yaraan afar iyo toban maalmood kahor billoowga waxbarashada guriga ama afar iyo toban maalmood kadib marka la xaqiijiyo meesha cunugu ka dagan yahay degmo dugsiyeedka, iyo halmar sanad kasta kadib markaas, waalidka samaynaaya kormeerka ama kormeeraaya waxbarashada guriga waa inuu soo gudbiyaa bayaan, muujinaaya yoolka ama xogta dhabta ah, una diraa kormeeraha guud.

Bayaanka caddaynta higsiga waa in lagu qoraa:

a) Magaca iyo ciwaanka ilmaha helaaya waxbarashada guriga;
b) Taariikhda Dhalashada Ilmaha;
c) Fasalka cunugu maraayo;
d) Magaca iyo ciwaanka waalidka kormeeraaya waxbarashada guriga;
e) Heerarka waxbarashada ee waalidka kormeeraaya waxbarashada guriga;
f) Koorsooyin kasta oo guud oo ardaygu doonaayo inuu ka qaybgalo iyo magaca dugsiga bixinaaya koorsooyinka iyo nashaadaadka ka baxsan manhajka ee cunugu doonaayo inuu ka qaybgalo
g) Caddaynta diiwaanka Tallaalka;
h) Caddaynta aqoonsiga (shahaadada Dhalashada) ama dukumiinti kale oo aqoonsi oo rasmi ah
i) Natiijooyinka guud ee guusha imtaxaanaadka, haddii ay jiraan

Waalidka kormeeraaya waxbarashada guriga waa inuu ku daraa casharka maadooyinka sharcigu amraayo in lagu baro dugsiyada dadwaynaha. **Casharka waa in la wadaa muddo dhan ugu yaraan afar saacadood maalin kasta muddo dhan ugu yaraan boqol iyo todobaatan iyo shan maalmood sanad kasta.**

Waa inuu hayaa diiwaanka sanadlaha ah (galka isku dhafan) ee koorsooyinka ilmuhu qaatay iyo qiimaynada guusha waxbarashada ilmaha, ayna ku jiraan natiijooyinka imtaxaanaadka guud. Haddii ilmuhu u wareego degmo dugsiyeed dawladeed, waalidku waa inuu keenaa diiwaannada, marka laga codsado, uuna siiyaan kormeeraha guud ama maamulaha kale ee degmo dugsiyeedka.

Waxaa fiican in waalidku lahaado diiwaannada aadka looga taxadaray ee labadaba casharada la baray iyo heerarka uu buuxiyay intii casharada la siinaayay.

Diiwanadaan ayaa muhiim u noqon doona waalidka sababo badan awgood, ayna ku jiraan:

- Haddii ardaygu u wareego dugsi dawladeed;
- Buuxinta codsiyada kuleejka iyo deeqaha waxbarashada; iyo
- Ilaha wax barista ilmaha yaryar ee qoyska.

Koorsooyinka uu qasabka ka dhigaayo sharcigu *(N.D. Century Code 15.1-21.0 iyo 15.1-21-02).* Xog dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha manhajka ayaa laga heli karaa webseedka Laanta Sharciyada ee Xeerka Qarniga ee North Dakota oo ah ndlegis.gov.

<u>Dugsiga Hoose iyo Dhexe (Fasallada 1-8 aad) - Casharada Qasabka ah.</u>
Si uu u ogolaado Kormeeraha guud ee Xarunta Dadwaynaha, dugsi kasta oo dawladeed iyo mid gaar loo leeyahay oo hoose iyo dhexe waa inuu ardayga siiyaan casharada maadooyinka:

- Fanka Luuqadda Ingiriiska, ayna ku jiraan akhriska, wax qorista, curinta qoraalka, naxwaha Ingiriisiga, iyo hinkaada
- Xisaabaadka
- Cilmiga Bulshada, oo ay ku jiraan:
  - Dastuurka Maraykanka
  - Taariikhda Maraykanka
  - Juquraafiga
  - Dawlada
  - Daraasaadka North Dakota, oo muhiimada lagu saaraayo juquraafiga, taariikhda, iyo beeraha gobalkaan, oo lagu baranaayo fasallada afraad iyo shanaad
- Sayniska, oo ay ku jiraan
- Waxbarashada Jirka
- Caafimaadka, oo uu ku jiro caafimaadka jirka, nadaafada, xakamaynta xanuunka, iyo dabiicada iyo saamaynada khamriga, tubaakada, iyo maandooriyaasha

<u>Dugsiyada Sare (Fasallada 9-12 aad) - Maadooyinka qasabka ah.</u>
Si uu u ogolaado Kormeeraha guud ee Xarunta Dadwaynaha, dugsi kasta oo dawladeed iyo mid gaar loo leeyahay ee sare waa inuu arday kasta siiyaa:

- Afar maado oo barashada farshaxanka Barashada Luuqada Ingiriisiga ah oo ka kooban taxaneyaasha ay ku jiraan fanka, wax qorista, iyo hadalka;
- Afar maado oo xisaab ah, ayna ku jiraan:
  - Hal cutub oo aljabrada II ah; iyo

- Hal cutub oo Aljabra II ay tahay oo shardi hore ah;
- Afar maado oo saynis ah, ayna ku jiraan:

- Afar maado oo saynis ah, ayna ku jiraan
    - Hal cutub oo sayniska Jirka ah; iyo
    - Hal cutub oo bayoolaji ah:
- Afar maado oo cilmiga bulshada ah, ayna ku jiraan:
    - Hal cutub oo taariikhda aduunka ah;
    - Hal cutub oo taariikhda Mareykanka ah, ayna ku jirto taariikhda qabiilada Ameerikaanka Dhalad ah;

  iyo
    - Hal cutub oo ka hadlaaya dhibaatooyinka dimuqraadiyada; ama
    - Cutub gaaban oo ka hadlaaya Dawlada Maraykanka iyo cutub qaarkiis oo ka hadlaaya

  dhaqaalah a;
- Cutub qaarkiis ka hadlaaya caafimaadka;
- Cutub nuskiis ka hadlaaya waxbarashada Jirka inta lagu jiro sanad dugsiyeed kasta, marka la xaqiijiyo in halmar afartii sanaba cutubku yahay casharka jirdhiska oo ku dhisan fikirka ayna ku jiraan casharka qiimeynta, hormarinta, iyo joogtaynta faya qabka jireed ee qofka;
- Labo cutub oo ka hadlaaya farshaxanka, ugu yaran hal kamid ah waa inuu muusig yahay;
- Labo cutub oo isla luuqada shisheeye ama Ameerikaanka dhaladka ah ku hadlaan;
- Hal cutub oo koorso meelayn heer sare ah ama hal cutub oo koorso labo dhibcood bixinaysa ah; iyo
- Labo cutub oo waxbarashada xirfada iyo farsamada ah kuna jira qorshaha diyaarsan ee waxbarashada ay ku talinayso waaxda waxbarashada xirfada iyo farsamada uuna oggolaaday kormeeraha guud ee casharada dugsiyada dawlada.

***Waa maxay masuuliyadaha saaran Degmo Dugsiyeedka?***

- Inay u sheegaan waalidka masuuliyadaha waalidka ee haynta diiwaanka waxbarashada ee ardayga ee arday kasta oo guriga wax lagu baro.
- Inay sharaxdo khayraadka iyo taageerada ardayda waajahaaya culaysyada dhanka waxbarashada una baahan kara waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira, iyo sidoo kale masuuliyada degmada dugsiga ka saaran aqoonsiga iyo inay si sax ah ugu adeegto ardayda noocaas ah.
- Inay bixiso himilooyinka degmada dugsiga deegaanku ka doonayso arday kasta si waafaqsan fasalkiisa ee maadooyinka sharcigu amraayo.
- Inay xog ka biixyaan guusha heerarka caadiga ah ee imtaxaanka ay bixisay degmadu iyo dookhyada waalidka ee ku aadan imtaxaanka.
- Inay bixiyaan nuqulka sharciga gobalka ee ku aadan waxbarashada guriga.

***Waa maxay masuuliyadaha <u>imtaxaanka</u> ee macalimiinta waxbarashada guriga?***

Imtaxaanaadka guusha ee caadiga ah waa in laga qaadaa arday kasta oo ku jira waxbarashada guriga ee fasalka afraad, lixaad, sideedaad, iyo tobnaad (N.D. Century Code 15.1-23-09).

Shardiga qaybtaan ma qabanayso haddii waalidku u sheego degmada dugsiga ee ardaygu dagan yahay in waalidku leeyahay diidmo falsafeed, mid mooraal, ama mid diimeed oo ku

aadan adeegsiga imtaxaanaadka guusha ee caadiga ah ama waalidku:

1. Uu yahay macalin haysta ruqsad ay siiyeen gudiga waxbarashada guud iyo farsamooyinka ama ay u fasaxeen inuu waxbaro ilmaha udiga waxbarashada guud iyo farsamooyinka;
2. Uu leeyahay shahaado jaamacadeed; ama
3. Uu buuxiyay ama ka kormaray buundada looga baahan yahay imtaxaanka macalinka ee heer qaran

oo lagu baxsho gobalkaan ama gobal kasta haddii gobalkaan uusan bixin imtaxaanka noocaas ah.

Waalidku waa inuu u bdiraa ogeysiis iyo dukumiintiga muhiimka ah ee qodobkaani amraayo degmada dugsiga isla waqtiga waalidku diro bayaanka doonista inuu kormeeraayo waxbarashada guriga ee ku cad qodobka 15.1-23-02.

Si loo buuxiyo shardigaan, Grand Forks Public Schools ayaa bixinaysa, si bilaash ah, imtaxaanka caadiga ah ee heer qaran. Tilmaamaha gaarka ah ee imtaxaanka iyo taariikhaha la qaadaayo ayaa boostada loogu dirayaa qoysaska ilmaha guriga wax lagu baro. Waalidiinta ayaa masuul ka noqon doona inay u sheegaan dugsiyada Grand Forks Public Schools haddii ay doonayaan in degmada dugsigu cunugooda ka qaado imtaxaanka.

Haddii waalidku doorto qof xirfad u leh (macalin ruqsad ka haysta Gudiga Waxbarashada Caadiga iyo Farsamooyinka) si uu u qaado imtaxaanka, qarashku waa masuuliyad saaran waalidka cunuga. Imtaxaanku waa inuu noqdaa mid laga keeno heerka buundada qaran ku cad taasoo bixinaysa celceliska guud ee buundada. **Waalidka kormeeraaya waxbarashada guriga waa inuu u gudbiyaa natiijooyinka guusha imtaxaanka guud ee ardayga kormeeraha guud ee degmada.**

Haddii buundada celceliska ah ee aasaasiga ah ee ilmuhu ka keeno imtaxaanka guud ay ka yar tahay boqoleeyda shan iyo tobnaad ee heer qaran, ardayda ayaa lagu samayn doonaan qiimaynta ciladaha waxbarashada waxaana bixin doona kooxda qiimaynta oo xirfado kaladuwan leh si waafaqsan tilmaamaha uu baxsho Kormeeraha Guud ee Casharada Dugsiyada Dawlada.

***Maxay tahay inuu waalidku u keeno Grand Forks Public Schools haddii ay doonayaan in cunugooda laga diiwaan gasho Grand Forks Public Schools kadib markuu guriga wax ku baran jiray?***

Ardayda guriga wax lagu baro ee loo wareejinaayo dugsiyada degmada ayaa laga doonayaa inay keenaan caddaynta muujinaysa liiska koorsooyinka ay qaateen, buundooyinka ay heleen, iyo natiijooyinka imtaxaanaadka guud ilaa in ardaygu yahay maahee mid uu sharcigu ka dhaafaayo imtaxaanka noocaas ah. Meelaynta waxaa lagu salayn doonaa heerarka meelaynta ee degmada.

Ardayda aan haysan diiwaannada ama diiwaanadoodu muujinaynin meelayn sax ah ayaa la marsiin doonaan imtaxaanka meelaynta. Ardayda la aaminsan yahay inay qabaan naafo waxyeelo ku ah waxbarashadooda ayaa la imtaxaani doonaa waxaana la gayn doonaa fasal waafaqsan sharciga iyo xeerka quseeya.

***Ardaygayga guriga wax lagu baro ma laga diiwaan gelin karaa fasallada mana ka qaybgeli karaa Nashaadaadka ka baxsan manhajka ee dugsiyada Grand Forks Public School?***

Ardayda guriga wax lagu baro ayaa u qalma inay u wareegaan dugsiyada Grand Forks Public

School iyo/ama inay ka qaybgalaan casharada gaarka ah ee degmada iyo/ama nashaadaadka ka baxsan manhajka si lamid ah ardayda horay uga diiwaan gashanaa degmada. Ardayga waa in laga diiwaangeliyo dugsiga ku yaala aaga uu dagan yahay.
Ardayda Dugsiga wax lagu baro waa inay buuxshaan shuruudaha guud ee waxbarashada si ay uga qaybgalaan waxaana lagu dabaqayaa isla heerarka ka qaybgalka ee ardayda sida buuxda u dhigta dugsiga. Ardayda guriga wax lagu baro ee dhigta fasallada dugsiga dawlada waa inay raacaan xeerka anshaxa ee ardayda ayna raacaan himilooyinkeena xaadirista.

***Guriga wax ma ku bari karaa cunugayga naafada ah?***

Haddii kooxda xirfadaha kaladuwan ee qiimayntu go'aamiso in ilmo uu naafo yahay, ilmahaas ayaa u baahan cashar si gaar ah loo naqshadeeyay sabab la xariirta naafada, iyo marka aan casharkaan la bixin karin ayadoo la helin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira, waalidka ayaa sii wadi kara inuu kormeero waxbarashada guriga, marka la xaqiijiyo:

1. In waalidku soo gudbiyay qorshaha adeegga oo loo diray kormeeraha guud ee degmada dugsiga kaasoo uu asago sameeyay ama uu la kaashaday degmada dugsiga; iyo
2. Qorshaha adeegyadu uu muujinaayo in baahiyaha gaarka ah ee ilmaha ay xal u helayaan shaqsiyaad u qalma inay bixiyaan adeegyada waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xariira.

Sanad kasta, kormeeraha guud ee degmada dugsiga ee cunugu dagan yahay waa inuu go'aanshaan hormarka waxbarashada ee macquulka ah ayadoo lagu salaynaayo qorshaha adeegga ilmaha.

Haddii waalidku ku fashilmo inuu soo gudbiyo Qorshaha Adeegga sida uu qabo qodobkaan, waalidka ayaa loo arkayaa inuu jebiyay xeerarka xaadirista waxbarashada ee qasabka ah mar danbana ma kormeeri karo waxbarashada guriga ee ilmaha.

Waalidka ayaa kormeeri kara waxbarashada guriga ee ilmaha qaba naafada kobaca haddii:

1. Uu dhakhtarka dhimirku go'aansho in ilmuhu qabo naafada dhanka kobaca;
2. Waalidka ilmuhu u qalmo inuu kormeero waxbarashada guriga si waafaqsan cutubkaan; iyo
3. Waalidka ilmuhu u diro kormeeraha guud ee degmada dugsiga ee cunugu dagan yahay:
    a. Ogeysiis sheegaaya in ilmuhu helo waxbarashada guriga;
    b. Nuqulka ciladaha laga helay cunuga ee naafada kobaca oo uu diyaarshay uuna saxiixay dhakhtarka Dhimirka oo Ruqsad haysta; iyo
    c. Qorshe adeeg ay abuurto ayna raacdo degmada dugsiga ee cunugu dagan yahay iyo waalidka cunuga; ama, kadib marka loo diro ogeysiis qoraal ah kormeeraha guud ee degmada dugsiga ee cunugu dagan yahay, qorshe kale oo adeeg, oo ay sameeyeen ayna raaceen, sida ku cad qodobka 15.1-23-15, kooxda qorshaha adeegga oo uu doortay uuna qarashkooda dhiibay waalidka ilmuhu.

Warbixinnada Hormarka Ilmo Qaba Naafada Kobaca

Markay tahay ama kahor koowda Nufeembar, koowda Feebaraayo, ama koowda Maayo sanad dugsiyeed kasta, waalidka kormeeraaya waxbarashada guriga ee ilmo qaba naafada kobaca sida ku cad qaybta 15.1-23-14 waa inuu u diraa kormeeraha guud ee degmada dugsiga ee cunugu dagan

yahay warbixinnada hormarka ee ay diyaarisay kooxda qorshaha adeegga ee lagu xushay sida ku cad qodobka 15.1-23-14.

Haddii marna kooxda qorshaha adeegu aqbasho in cunugu uusan ka faa'iidaysanayn waxbarashada guriga, kooxda ayaa u sheegaysa degmada dugsiga ee cunugu dagan yahay waxayna codsanaynsaa in ardayda ay qiimayso koox xirfado kaladuwan leh oo uu magacaabaayo

kormeeraha guud ee degmada dugsiga ee cunugu dagan yahay. Kormeeraha degmada dugsiga ee cunugu dagan yahay waa inuu u diraa nuqullada dhammaan dukumiintiyada lagu maray qodobkaan uuna u diraa kormeeraha guud ee casharada dugsiyada dawlada.

***Ardaydayda guriga wax lagu baro ma heli karaan shahaadada dugsiga sare?***
Degmado dugsiyeedka Grand Forks Public School (GFPS) ma siiso shahaadooyin ardayda guriga wax lagu baro. Waa qasab in ardaydu ay ka diiwaan gashan yihiin barnaamijka waxbarashada guud ee Degmada ayna buuxiyaan shuruudaha muhiimka ah oo dhan si ay ugu qalmaan shahaado.

***Sidee ayay macalimiintayda guriga ku helayaan agabka waxbarashada?***
Waalidiinta ayaa masuul ka ah soo iibsiga dhammaan agabka. Buugaagta akhriska ee degmada dugsiga ayay caariyo ku qaadan karaan macalimiinta waxbarashada guriga haddii degmo leedahay nuqulo dheeraad ah. Tan kuma jiraan kiishadaha iyo waxyaabaha dhamaan kara (kiishadaha sayniska, foomamka buundada, buugaagta qoraalka, iwm.). Haddii aad doonayso inaad adeegsato buugaagtaan akhriska ee degmada dugsiga, fadlan la xariir Xafiiska Kaaliyaha Kormeeraha Guud oo aad ka helayso (701) 746-2205, ext. 7115. Lacag damaanad ah oo dhan $50.00 buug akhriseed kasta oo la qaato (oo aan ka badan karin $200.00) ayaa la bixin doonaa xiliga qofku buugta qaadanaayo. Wadarta guud ee lacagta damiinka ah ayaa loo celin doonaa waalidka kadib marka buugaagta lasoo cesho. Buugta waa in la soo ceshaa ugu danbayn Juun 15keeda. Haddii aan buugaagta akhriska lasoo celin, qoyska ayaa laga dalban doonaa qarashka buuxa ee buugaagta akhriska taasoo laga jaraayo lacagta damaanada ah.

***Waa maxay fursadaha waxbarashada ee federaalku maal gasho ee macalimiinta iyo ilmaha guriga wax lagu baro heli karaan?***
Hoos waxaad ka helaysaa qeexitaanka barnaamijyada federaalku maalgasho ee ay heli karaan macalimiinta iyo ardayda waxbarashada guriga.

Ciwaanka I (Title I) – Kobcinta Guusha Waxbarashada Dadka Danyarta ah
Title I ee Sharciga Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare ayaa siiya caawimaad dhaqaale wakaaladaha waxbarashada heer gobal iyo kuwa maxaliga ah si ay u buuxiyaan baahiyaha ilmaha qaba dhibaatada waxbarashada, ee khatarta ku jira. Yoolka barnaamijka Title I waa in adeegyada casharka iyo nashaadaadka la baxsho si loo buuxsho baahiyaha carruurta dhibaataysan ee la aqoonsaday inay ku fashilmayaan ama khatar ugu jiraan inay ku dhacaan heerarka adag ee guusha waxbarashada gobalka. Barnaamijyada Title I ee Grand Forks Public Schools ayaa siiya carruurta caawimaad waxbarasho oo dheeraad ah oo ka badan inta fasalka caadiga ah lagu bixiyo. Cunugaaga ayaa loo adeegi doonaa haddii uu buuxsho shuruudaha la higsanaayo ee dugsigaagu dejiyay.

Ciwaanka II (Title II) A – Sanduuqa Tababarka iyo Shaqaalaysiinta Macalinka iyo Maamulaha
Barnaamijka The Title II, Qaybta A waxaa loogu talagalay inuu kordhiyo guusha dhammaan ardayda ayadoo la adeegsanaayo xeelado sida kor u qaadista tayada macalinka iyo maamulaha,

kordhinta tirada macalimiinta tayada badan leh ee fasalka iyo maamuleyaasha tayada sare leh iyo kaaliyaasha maamulaha ee dugsiyada, iyo hoos u dhigista tirada ardayda fasalka gaar ahaana fasallada dugsiga hoose-dhexe. Title II Qaybta A ayaa sidoo kale gacan ka gaysanaaya kula xisaabtan degmada dugsiga guusha waxbarashada ardayga.

Haddii aad doonayso xogta ku aadan sida adiga iyo cunugaagu uga faa'iidaysan kartaan wax kamid ah adeegyada lagu bixiyo sanduuqyada Title I ama Title II A, fadlan la xariir Xafiiska Kaaliyaha Kormeeraha guud (701) 746-2200 ext. 7115.